



Xasuusinta Cashuurta marka Dib loogu noqonayo Dugsiyada: Waxbarashada Minnesota Ku Kordhin Iyo Ka Saarid


Back to School Tax Reminder: Minnesota Education Credit and Subtraction

Meel dhigo Rashiidyada Sahayda Iskuulka si aad ugu Isticmaasho Canshuur Celintaada Gobolka!

Kolka aad xareysato canshuur celintaaga gobolka Minnesota, waxaa dhici karta inaad awoodo inaad sheegato labada mid lacagta **kiridhidka** canshuurta gobolka ah ama midda ka **jaritaanada** ku saabsan ee kharashaadka ku shaqadda leh tacliinta ilmahaaga. Arritani waxa ay quseeysaa ilmaha uulada (kindergarden) ka ilaa iyo dugsiga sare ku jira.

Qaadashada kiridhidku waxa ay yareeysaa cadadka canshuurta ah ee aad bixinayso. Haddii lacagta kiridhidka ahi ay ka badan tahay canshuurta aad bixinayso, waxa kuu noqon karta lacag. Laakiin haddii lacag badan aad sameyso ma aad sheegan kartid lacagta kiridhidka ah. Haddii arrintu ay saa tahay kolkaa waxa aad isticmaali kartaa ka jaritaanka.

Jaritaanku waxa uu yareeyaa dakhligaaga kolkaa waxaa lagugu yeelan canshuur yar. Laakiin lacagi kuuguma soo noqon adeegsiga jaritaanka.



Marmar dhif ah, waxa aad sheegan kartaa lacagta kiridhidka ah **iyo** jaritaanka labadaba. La hadal canshuur buuxiye haddii aad haysato ilmo dhigta dugsi sare aadna bixiso kharash koorsooyin uu kuleej ka qaato ama khidmad iskuul lacag ah oo ilmahu dhigto.

Ku Darid (U Xisaabin)

Ku daridda aad heli kartid waxay ku egtahay 75% kharajka mudan in aad xisaabsato oo aad sanadka ku bixisay waxbarashada caruurtaada ee mudan ee fasalada K-12 waxbarashada ku jira, illa tirsiga ugu sareeya. 25% ee soo hartay ee kharajka muhimadda leh, looma isticmaali karo in aad ku dacwooto ka jarid cashuurta. Kiridhidka ugu badani waxa uu le'eg yahay \$1,500 ilmahiiba laakiin waa la yareyn karaa haddii dakhligaaga marka kharajka laga jaro uu ka badan tahay \$75,820.

Tusaale ahaan, haddii ay aad haysato 1 ama 2 ilmood, oo xaq u leh, waxa aad sheegan kartaa dhamaan ama qayb kiridhidka ah haddii dakhligaaga kharajka laga jaro uu yahay \$81,820 ama uu ka yar yahay. Haddii aad haysato ilmo ka badan 2 ilmood, xadka dakhligu waxa uu kor aadaa \$3,000 ilmo walba oo dheeraad ah.

Ka eeg shaxanka Xadadka Dakhliga ee Kiridhidyadda Tacliinta K-12 ([Income Limits for the K-12 Education Credit](http://www.revenue.state.mn.us)) Barta Waaxda Dakhliga ee Minesota (Minnesota Department of Revenue) ee ah <http://www.revenue.state.mn.us>.

Ogow: Sannad canshuureedka 2022 iyo wixii ka horeeyeyba, waa khasab inaad isticmaasho dakhliga qoyska intii aad isticmaali lahayd dakhliga guud ee kharajka laga jaray si aad u ogaato inaad heli karto kiridhidka iyo kale.

Haddii aad xaas tahay oo aad cashuurta ku xeraynaysid xaas kala nool ha ku dacwoon ku darka.

Ka jaridda

Dakhligu ma khuseeyo ka jaridda. Ka jariddu waxay ku egtahay \$1624 ee arday kasta oo u qalma kuna jira fasalka K – 12.

Caruurta dhigata fasalka 6aad iyo 7aad isticmaal xaddiga la ogolyahay ee fasalk ardayga dhamaadka sannad cashuureedka. Caruurta bilowday kuliyaadda inta lagu jiro sannad cashuureedka, isticmaal xaddiga fasalka 12aad. Laakiin dugsiga sare waxaad keliya oo aad ka jari kartaa kharajka waxbarasho ee mudnaanta leh.

Sidoo kale, si aad u sheegato ka jarida, ilmahaagu waa inuu iskuul la dhigtay gobolada Minnesota, Wisconsin, Iowa, North Dakota, ama South Dakota.

Maxaan u baahnahay si aan ugu dacwoodo waxyaabaha lagu kordhiyey ama reebay?

Si aad u dacwootid ku darid iyo ka goyn kaydi xaashida lacag bixinta (risiidka) marka aad qalabka dugsiga iibsatiid , oo ay ku jiraan qalmaanta qoriga ah, qalimada, qalimada wax lagu midabeeyo, buuga wax lagu qorto, kaalkulaytar iwm.

Waxaad kaloo ku dacwoon kartaa kharajyada ay ka mid yihiin:

- Kharashkaadka qalabka kumbuyuutarka iyo soofti weerada tacliinta (ilaa iyo \$200)
- Macallin caruurta wax kuu bara
- Buugagta waxlaga barto
- Kharajka gaadiidka ee la siiyay cid kale
- Casharada muusikada
- Barnaamijyada warbarasho ee dugsiga markuu dhamaado la bixiyo
- Xeryaha waxbarasho ee xagaaga

Qaar ka mid kharashaadka waxaa lagu xisaabiyaa jaritaanka laakiin laguma xisaabiyo kiridhidka. Tusaale ahaan, waxa aad u isticmaali kartaa kharashaadka khidmaha iskuuladda lacagta ah ama koorsooyinka kuleejka (inta ilmahaagu uu dhigto dugsiga sare) kaliya jaritaanka.

Qaar ka mid ah kharashaadka laguma xisaabin karo labada midna kiridhidka ama jaritaanada. Kuwaa waxaa ku jira kharashaadyada xeryaha kubada, ama casharada iyo socdaalada, jiifka iyo cuntada ee safarada fasalka ee habeenkii la dhaxayo.

Foomamka

Si aad ugu dacwooto ku darid, buuxi jadwalka M1ED ee foomka cashuurta gobolka ee Minnesota.

Si aad u qaadata ka jaridda marka dakhliga qoysku uu ka sareeyo xaddiga ugu badan ee aad u dacwoon kartid, isticmaal tilmaan bixinta warqadda ay ku taal jadwalka M1ED.

Xusuuso waa IN AAD haysataa waraaqaha aad wax ku gadatay (risiidka) si aad ugu dacwootid ku dar ama ka goy. Kuma dacwoon kartid isla kahrajii aad u iticmaashay ku dar in aad u isticmaalsho ka goy.



Macluumaad dheeraad ah

Haddii aad u baahantahay macluumaad iyo faahfaahin dheeraad ah ee liiska khrajyaka aad ku dacwoon kartid, ka fiiri mareegta Waaxda Dakhliga ee Gobolka Minnesota <http://www.revenue.state.mn.us> oo geli baar weedha “Ku darid iyo Ka goyn ee Waxbarasho”

Waxaad kaloo ka heli kartaa xog aruursan oo kharashayada ku saabsan barta:

www.revenue.state.mn.us/k-12-education-subtraction-and-credit-0

www.revenue.state.mn.us/qualifying-home-school-expenses-k-12-education-subtraction-and-credit-0

Weydiisi gargaar

Si aad u xaqiijiso in aad heshay **lacag celinta**, tag barta diyaarinta cashuurta oo lacag la’aan ah. Si aad u hesho bar lacag la’aan ah wac (651) 297-3724 or (800) 543-7709.

Tag www.irs.gov/vita si aad wax badan uga baratid sida caawimo iskaa wax u qabso ah ee Cashuurta Dakhliga loo sameeyo, iyo la talinta cashuuraha dadka waaweyn.

Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambaysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.

© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.